



# Booqashooyinkeena muuqaalka waxay hadda u fudud yihiin sida 1-2-3!


1. **Looma baahno wax ablikeeshin ah in lasoo dejiyo:** Uma baahnaan doontid inaad soo degsato aalada Zoom ii aad usamayso Booqashooyinka muuqaalka ah maadaama aan hadda isticmaaleyno aalada Epic. Marka aad gudaha u galayso aalada Epic oo lagu samaynayo Booqashada muuqaalka ah, waxaad u baahnaan doontaa inaad aqbasho fariin qoraalka soo boodeysa taas oo u oggolaanaysa barawsarka inuu isticmaalo kamarada iyo makarafoonka.



2. **Gudaha u gal:** Marka aad gudaha u gasho aalada cusub, hoos waxaad ka helaysaa sawiro muujinayo waxa aad arki doonto. Mar hadii aad joogtid shaashaddan, waxaad awoodi doontaa inaad tijaabiso codkaaga iyo makarafoonkaaga ka dibna riix “join call (Ku biir wicitaanka)”.



- 3. **Qolka sugitaanka:** Mar haddii wacitaanka aad gasho waxaad ku jiri doontaa qolka sugitaanka tooska ah inta aad sugayso bixiyaha inuu ku soo biiro wacitaanka sida hoos lagu arkay.



## Sidoo kale wuu ku cusub yahay Booqashooyinka Muuqaalka ah:

- **Bukaanka hadda waxay ku casuumi karaan martida Booqashooyinka Muuqaalka ah iyada oo la adeegsanayo MyChart**  
Iyadoo la adeegsanayo MyChart, bukaanka hadda waxay ku dari karaan xubnaha shabakadooda taageerada - sida xubnaha qoyska ama daryeel bixiyaasha - si ay ugu biiraan booqashooyinka muuqaalka ah. Si aad tan u samayso, si fudud u guji “View and invite participants (Eeg oo Casuun Ka qaybgalayaasha)” ee ku yaal bogga faahfaahinta ballanka booqashadaada muuqaalka ee qorshaysan. Halkaa, waxaad ka arki kartaa bixiyaha loo qorsheeyay booqashadaada iyo bixiye kasta ama martida kale ee ay horay u casuumeen bixiyehoodu, iyo sidoo kale u soo diri xiriirinta tooska ah ee wakiilada, xidhiidhada degdega ah, ama martida cusub.



- **Kor soo saar ka qaybqaataha Booqashada Muuqaalka ah**  
Ku dhejinta ka qaybqaataha waxay hubinaysaa inaad mar walba arki karto, xitaa marka ay jiraan ilaa shan ka qaybgalayaasha booqashada oo aanay ahayn kuwa ku hadla firfircoon. Si aad tan u samayso, guji muuqaalka ama magaca ka qaybqaataha aad rabto inaad

fiidiyooga ku dhejiso. Guji magacooda ama muuqaalkooda mar kale si aad u furto ka qaybqaataha.